

Macluumaad loogu talagalay waalidiinta iyo qoysaska Ilmahaaga xanaanada kujira ayaa ka qaybqaadanaya!

Qoysaska, waalidiinta qaaliga ahoow,

Waxaan ku faraxsannahay in ilmahaaga xanaanada kujira uu ka qaybqaadanayo mashruuca cilmibaarista tooska ah ee *Fit in die Zukunft – Digitale Bildung in Kitas* (ProFiZ). Mashruuca waxaa maalgalinaysa Wasaaradda Waxbarashada, Arrimaha Qoyska, Dadka da'da ah, Dumarka iyo Dhalinyarada (BMBFSFJ) ee Federaalka waxaana anaga oo ah kooxda Zentrum PEP gGmbH.

Muxuu mashruucu ku saabsanyahay?

Caruurta waxay ku dhex korayaan dunideena dhijitaalka noqotay – laga soo bilaabo qalabka wax nadiifiya ee robotka ah iyo tabletyada ilaa bandhigyada dhijitaalka ah ee kasoo muuqda boosteejooyinka basaska. Xataa inta ay kujiraan da'da xanaanada, waxay khibrad balaaran ka helayaan teknoolojiyadaha iyo macluumaadka noocaas ah. Waxay khibradahaas la yimaadaan xanaanada, halkaasoo ay kasii ambaqaadaan xirfadleyaasha waxbarashadu si waxtar lehna loogu taageero looguna balaariyo.

Mashruuceena, waxaan si dhow ula shaqaynaa xirfadleyaal waxbarasho oo fara badan si aan si wadajir ugu soo diyaarino agabyada loogu talagalay in caruurta loogala shaqeeyo sidii ay ku heli lahaayeen xirfado hoolwadeenadana dijitaalka aduunka wax ku-ool u ah dunideena oo ay ku helayaan goob ammaan ah. Tusaale ahaan, caruurta waxay helayaan sidoo kalena baranayaan sida hal-abuur loo sameeyo, la isula shaqeeyo, la isula hadlo, si qoto-dheer looga fakaro teknoolojiyada iyo warbaahinta loolana falgalo iyo xogaha si taxaddar leh.

Ka kooxda mashruuca ahaan, waxaan ka taageerna xirfadleyaasha iyo sidoo kale caruurtaada sidii ay wax uga baran lahaayeen aduunka dhijitaalka ah si joogto ahna uga qaybqaadan lahaayeen qaabayntiisa.

Sidee mashruucu uga shaqeeyaa xanaanada?

Waxaan ardayda ku takhasustay u soo bandhigeynaa fikrado ku saabsan ciyaaro kala duwan iyo waxqabadyo waxbarasho oo ay ku tijaabin karaan carruurta.. Mowduucyada waxaa kujira isticmaalka shaqada ablikeeshinada cimilada, in sheeko lala sameeyo chatbot-ka, qaabka anagu ka bili'aadan ahaan u wadahalalno qarniga 21aad analog iyo digital labadaba iyo waxyaabaha robotyadu noo qabtaan ka bili'aadan ahaan.

Kaddib markii ay iskudayaan, xirfadleyaasha waxay nagu soo celinayaan sida ay u arkaan: Ka fulinta xanaanadu si wanaagsan ma u socotaa? Caruurta ma danaynayaan? Caruurta ma awoodeen inay xirfadahooda foomamka jawaab celinta gaagaaban ku dhisaan?

Waxaan sidoo kale ku dhiirigalinaynaa in xirfadleyaashu ka qaybqaataan qoritaanka xirfadaha caruurta si qarsoodi ah ayagoo isticmaalaya KiDiT®. KiDiT® waa aalad dhijitaal ah, saynis ahaan u diyaarsan taasoo inta badan laga isticmaalo gobolka DACH waxayna waafaqsantahay GDPR. KiDiT® waxay xirfadleyaasha ka taageertaa inay si habaysan u diiwaangaliyaan xirfadaha ay arkeen si aan ugu isticmaalno cilmibaarista iyo horumarinada mustaqbalka ee agabka.

Ugu danbayn

Waad ku mahadsantahay ka qaybqaadashadaada mashruuceena iyo aaminaadadaa. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad jeclaan lahayd inaad wax badan ka ogaato, fadlan haka labalabayn inaad nala soo xiriirto. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaadkii ugu danbeeyay mashruuca webseedkeena.

Waxaad nagula soo xiriiri kartaa iimaylka: profiz@zentrum-pep.de

Wixii macluumaad dheeraad ah: www.profiz-kita.de

Xushamad qaaliya oo kaaga timid kooxda ProFiZ

Henrike Aden, Manja Flöter, Madeline Meyer, Stella-Louise Rosière, Dr Jasmin Bempreiksz-Luthardt and Prof. Dr Catherine Walter-Laager



*Internationales
Zentrum PEP gGmbH
Alexanderufer 3-7
10117 Berlin*

*profiz@zentrum-pep.de
www.profiz-kita.de*



Bundesministerium
für Bildung, Familie, Senioren,
Frauen und Jugend